

POST HOLDINGS, INC.

# A Post For All

**FEBRAAYO 2023** | ARRINTA #2

## Caan Noqosho (Cinwaan Samayn): Shirkadda Michael Foods oo Shaqaalaysiinaysa Qaxoontiga, Adeegeedana Ku Lifaaqeysa Nidaamyada Taageerada

Dhawaan, Raadiyaha Dadweynaha ee Iowa ayaa ka warbixiyay dadaallada horumarinta xoogga shaqada ee gobolka si kabo faraqa shaqo yaraanta iyadoo ganacsiyada lagu tababarayo sida loo shaqaaleysiiyo bulshooyinka qaxootiga iyo Iowan-ka ajnabiga ah. Sida ku cad sheekooyinka IowaWORKS waxay iskaashi la samaysay hay'adaha dib u dejinta si ay u bixiso tababar sadex qaybood ah oo ku saabsan sida loo shaqaaleysiiyo Ioona taageero dadka reer Iowa ee ajnabiga ah.

Iyadoo la muujinayo shirkadaha leh barnaamijyada shaqaaleynta qaxootiga ee guusha gaaray, Raadiyaha Dadweynaha Iowa waxay la hadleen shaqaaleysiiyaha sare Alex Borsay ee jooga Shirkadda Michael Foods kaasoo wadaagay borotokoollada iyo dhaqamada abuuray khibrad hufan oo u sharaxnaanta shaqada shirkadda ah.

---



*Shaqaalaysiinta dhiggooda ah ee la shaqeeya bulshooyinka qaxootiga, halkan waxaa ku yaala seddaxda sharciyo ee ay isticmaalaan Shirkadda Michael Foods iyo Alex Borsay:*

1. **Ku dhafida adeegyada turjubaanka:** Shirkadda Michael Foods, oo adeegga turjumaadda ku dhafaysa hannaanka shaqaalaynta (bilawga ilaa dhamaadka) waxay taasi naga caawisay si wanaagsan u dhexgalida musharixiinta shaqada, ka gudbitaanka caqabadaha xilliga waraysiga, iyo xaqiijinta in shaqaaluhu ku raaxaystaan oo si fiican ugu tababartaan boosaska/jagooyinka shaqo.
2. **Dib u eegista borotokoolka iyadoo diiradda la saarayo ka mid noqoshada iyo dareenka lahaanshaha:** Waajibaadka sida "diiditaanka koofiyadaha " waxay ka hor iman karaan dhaqamada iyo/ama diimaha shaqaalaha cusub; marka kooxaha DEI ay la kulmaan siyaasadaha saameeya shaqaalaha, waa in si degdeg ah wax looga qabto.
3. **Hormar ku samaynta habka taageerada joogtada ah:** Fikrad ahaan, waxaa xoog ka jiri doona dhanka tirada ay u badan tahay -- shaqaaleysiinta kooxaha waaweyn waxay gacan ka geysan kartaa abuurista bulsho, baabi'inta caqabadaha hor taagan kuwa ku soo biiraya - laakiin si qotodheer uga fikir sida shirkaddaadu u hawlgeli karto, u ururin karto jawaab-celin, oo ay u sii wadi karto taageero habaysan, oo ku salaysan baahiyaha shaqaalaha qaxootiga ah.

## Boostada DEI Waxay Ku Dartay Laba Xubnood Oo Cusub

Waxaan ku bilaabaynaa 2023 qaybteena labaad ee A Post For All, warside loogu talagalay in lagu aqoonsado shaqada muhiimka ah ee kala duwanaanshaha, sinnaanta iyo ka mid noqoshada (DEI) ee guud ahaan shirkadda Post Holdings, Inc. Waxaan kugu martiqaadeynaa inaad nala shaqeyso oo aad nala wadaagto jawaab celintaada inta aan sii wadno inaan wax badan ka barano aqoonsigeena wadajirka ah, oo aan aqoonsanno oo aan tirtirno caqabadaha hortaagan fursadda guud ahaan ururkeenna.

Qaar ka mid ah wararka xiisaha leh ee naga yimid - laba xubnood ayaa ku biiray Golaha DEI ee Post: Nick Martin, Agaasimaha Sare, ESG (PHI) iyo Van Colson, Agaasimaha Sare, Hannaanka Wax Soo Iibsiga & Istaraatiijiyada (PHI). Ka mid ahaanshaha Nick iyo Van ee Golaha waxay aragti qiimo leh ku soo kordhin doontaa tillaabooyinka ganacsigeennu qaadayo si aan dadaallada DEI ugu dhex dhafno guud ahaan aalada maamulka bulshada iyo ballaarinta fursadaha alaab-qeybiyeyaasha kala duwan.

Fursado badan ayaa soo socda waxaanan rajeyneynaa inaan sii wadno horumar joogto ah marka la gaaro 2023!

***Hogaamiyayaasha Golaha Kala Duwanaanshaha, Sinaanta iyo Ka Mid Noqoshada Post***



**DALLAS CUPP**
Post Holdings
dallas.cupp@postholdings.com



**T.D. DIXON**
Post Consumer Brands
tkdixon@postholdings.com



**THYME HILL**
Bob Evans Farms
thyme.hill@bobevansfoods.com



# 8 Su'aalood

## lala yeelanayo Brian Foster, Injieer Sare oo Xagga Qeybta IT-da Dheskitoobka ah, Bob Evans Farms

### Waa maxay doorka aad kaga jirto/ jagadada aad ka hayso Bob Evans Farms?

*Tan iyo markii aan ku soo biiray Bob Evans Farms (BEF) sanadkii 2020, waxaan ka mid ahaa kooxda Injineernimada IT-da Kumbiyuutarada Dheskitoobka. Waxaan ahay Injineer Sare oo xagga IT-ga ah, oo mas'uul ka ah raadinta xalalka cilladaha qalabyada iyo softaweerada shaqaalaheenna si ay u wataan shaqadooda maalinlaha ah oo ay u dhaqaajiyaan ganacsiga iyaga oo aan la kulmin wax qalqal shaqo ah.*

### Xagee ku soo kortay?

*Waxaan ahay muwaadin ku faana Columbus, Ohio. Waxaan ku dhashay West Virginia laakiin waxaan ku soo barbaaray Columbus. Waxaan jeclahay ciyaaraha, gaar ahaan kubbadda cagta Gobolka Ohio. Gabadhayda 5-jirka ah, Aurora, iyo anigu sinaba uma seegno ciyaar. Waxaan ka tagay Ohio in muddo ah markii aan ku biiray militariga oo aan ku soo wareegay Afgaanistaan, Ciraaq iyo meelo kale oo Bariga Dhexe ah, laakiin waxaan ku soo noqday qoyskayga markii socdaalkaygu dhamaaday. Columbus waa gurigayga.*

### Waa maxay laanta ciidamada ee aad ka tirsanayd?

*Hooyaday iyo aabahay labaduba waxay ku jireen Ciidanka sidaa darteed waxaan ogaa in ciidanku noqon doono mustaqbalkayga qaabkey noqotaba. Waxaan doonayey inaan aduunka sahamiyo, ciidamada badda ayaana i siiyeen fursadaas. Waxaan ahaa Seabee oo ka tirsan Guutada Dhismaha Wareegga ee Badda, waxaan dhisaynay waddooyin, buundooyin iyo isbitaallo. Kooxdaydu waxay qodeen ceelka ugu qoto dheer taariikhda Afgaanistaan si bulshooyinka yaryar ay u noqdaan kuwo isku filan oo ay u helaan biyo iyaga u gaar ah. Waxay ahayd shaqo adag laakiin aad loogu farxo. Waxaan la xiriiraa qaar ka mid ah saaxiibadayda Seabee waxayna wali isticmaalaan calaamada wicitaanka, "Toad."*

### Waa maxay qaybta ugu fiican ee shaqadaada?

*Waxaa hubaal ah in isdhexgal lala sameeyo dad badan oo kala duwan iyo dhegeysiga aragtidooda. Waxaan ahay qof bulshaawi ah. Inta lagu jiro usbuuca, waxaa la iigu yeeraa inaan caawiyo waax kasta oo ka tirsan shirkadda. Intaa waxaa dheer, waxaan jeclahay inaan u qaato inaan haysto shakhsiyad madadaalo leh, sidaas darteed waxaan raadiyaa habab aan wax ku beddelo si aan wax walba uga dhigo kuwo fireesh ah. Dadku marka ay i eegaan waxay ogyihiin inaan ka dhigi doono inay dhoola cadeeyaan. Noloshu aad bay u gaaban tahay.*

### Maxaa casharo ah oo aad ka baratay nolosha oo ku caawiyey?

*Marka hore, waligaa naftaada ha ka niyad jabin - haddii aad aaminsan tahay naftaada, waxaad samaynayso, waxaad u badan tahay inaad gaari doonto yoolalkaaga iyo riyadaada. Marka labaad, waligaa naftaada ha u sheegin maya. Waxaa jira dad badan oo kale oo kuu dhihi doona maya, marka taas bedelkeeda naftaada u sheeg haa. Adiga is aamin/isku kalsoonow!*

### Waa maxay sababta kala duwanaanshuhu, sinnaanta iyo ka qeybgelinta ay muhiim kuugu yihiin?

*Waxaa jira 8 bilyan oo qof oo adduunka ku nool, mid kastana wuxuu qabaa aragti ka duwan qofka kale - waxaan u maleynayaa in taasi tahay mid cajiib ah! Iyada oo ay jiraan dhaqamo sidaas u badan, iyadoo ay jiraan siyaabo badan oo kala duwan oo wax walba loo qabto, waxaa muhiim ah in la raadiyo oo la qaato aragtiyo badan oo kala duwan marka la go'aaminayo waxa la samaynayo. Haddii dadku dareemaan in codkooda la maqlayo oo baahidooda la daboolayo, waxay u badan tahay inay ka qaybqaataan.*

### Maxaad u malaynaysaa inay tahay sifada ugu muhiimsan ee lahaan karo hogaamiye kaqeybgelinta?

*Dhageysiga shaqaalahooda iyo ku-dhaqanka waxay sheegeen. Way u fududahay hoggaamiyeyaasha inay dhahaan inay maqlaan fikradaha shaqaalahooda, laakiin waxay u baahan yihiin inaysan hadal ahaan uun u hadlin, laakiin sidoo kale inay ka dhabeeyaan. Barnaamijyadooda miyay ka tarjumayaan baahida shaqaalahooda? Shaqaalahooda iyo iyaga ma wada socdaan? Taasi waa calaamad hubaal ahaan muujinaysa inuu qofka yahay hoggaamiye ku dhaqma ka qeybgelin.*

### Waa maxay badeecada aad ugu jeceshahay ee BEF?

*Baradho La Shiddey oo La Raray. Gacmaha oo u dhig.*



AALADA ZOOM UGA WADA XIRIIRISTA WEETABIX:

## Weetabix oo Ballaarinaysa Isla Markaana Xoojinaysa Shabakadda Ka Qeybgelinta Kala Duwanaanshaha Cuntada (DIG)



*Waxaa qoray Emma Varlow, Madaxa libka, Weetabix*

Inta aan ku jirno safarkeena **Ku darida aan qofka ka reebbanayn** ee aan ka wadno Weetabix, mid ka mid ah faa'iidooyinka muhiimka u ahaa arrinkaan wuxuu ahaa barashada iyo isku xirka shbakada shirkadda cuntada ee ka faala-qaadayaasha iyo ka-qaybgaleyaasha ee la yiraahdo [Kala duwanaanshaha & Ka Mid Noqoshada Cuntada](). Shabakaddan waxa la sameeyey in ka badan saddex sano kahor waxaana sameeyey tiro yar wax-soo-saarayaal iyo alaab-qeybiyeyaal hormood ah si ay u bilaabaan doodda ku saabsan sida aan si wadajir ah uga dhigi karno warshadaha raashinka meel si loo wada dhan yahay looga shaqeeyo. Hawlgalayaasha waxay DIG u isticmaalaan sidii meel nabdoon oo ay ku wadaagaan dhaqamada ugu wanaagsan, siyaasadaha, iyo dadaallada ka-qaybgalka shaqaalaha si loo horumariyo DEI-da dhammaan qaybaha kala duwan ee warshadaha raashinka. Saddexda qeybood ee shaqo ee ugu waaweyn ee DIG waa Barashada La Wadaago, La-talinta iyo munaasabadooda sannadlaha ah, ee "D&I in Grocery LIVE."

Weetabix waxay ahayd mid ka mid ah xubnihii ugu horreeyay, oo hadda shabakadda waxaa ku jira in ka badan 75 tafaariiqle, alaab-qeybiyeyaal iyo warbaahino, yaryar iyo waaweynba.

Iyada oo qayb ka ah shabakaddan, waxaan ku faraxsannahay inaan martigelinno "Shaybaar Waxbarasho oo Toos ah" marka la gaaro Agoosto kaas oo ku saabsan sida aan si wanaagsan ugu taageeri karno daryeelayaasha xoogga shaqada; kani waxa uu ahaa kulan macmal ah oo aanu ku wadaagnay istaraatijiyadeena DEI oo aanu ku soo bandhignay nidaamyada taageerada ee aanu u dhisnay shaqaalaha daryeelayaasha ah.

Waxaan sidoo kale ku martiqaadnay [Carers UK]() si ay noola wadaagaan sida ay u bixiyaan taageero maaliyadeed iyo mid wax ku ool ah iyo mawduucyada ugu sarreeya ee ay maskaxda ku hayaan sanadka 2023.

Dhab ahaantii, tan iyo markaas waxaan si gaar ah ula xiriirnay qaar ka mid ah shirkadaha kale ee FMCG (shirkadaha iibiya alaabta macaamiisha ee dhaqsaha badan) si aan ula wadaagno waxbarashadeena iyo dhaqamadayada ugu wanaagsan marka ay timaado daryeelayaasha. Tani waxay fursad weyn u ahayd Weetabix si ay meeshaas ugu muujiso hoggaaminta oo ay sidoo kale u soo bandhigto faa'iidooyinka istaraatijiyadda Ku-Daritaanka Aan Qofka Laga Reebayn.

Waan ka mahadcelineynaa iskaashiga aan la leenahay DIG sababtoo ah waxaan ku jirnaa bulshada sida degdegga ah u koraysa ee ka kooban hogaamiyayaal sinaan ah. Bishii Oktoobar, DIG waxa ay martigelisay dhacdo "Waxbarasho Khadka Tooska ah" oo ay ka soo qayb galeen in ka badan 1,600 oo ka kala yimid warshadaha oo dhan. Tani waxay ahayd fursad lagu maqlo fikradaha shirkadaha kala duwan ee warshadaha cuntada, fikradahaas oo ku saabsan mawduuca DEI. Weetabix waxay nasiib u yeelatay inay ku biirto 40 meherado kale si ay uga mid noqoto munaasabada shabakadeynta xawaaraha leh halkaas oo aanu ku wadaagnay sida sheekooyinka gaarka ah ee shaqaalaheena ay u keeneen waxqabad iyo isbeddel.

Habka ugu guulaha badan ee aan ka helnay Weetabix si aan u wadaagno sheekooyinka wuxuu ahaa isticmaalka kal-fadhiyadeena quraacda ee Ku Daritaanka Aan Qofka Laga Reebayn, kuwaas oo aan wadnay in ka badan saddex sano hadda. Kalfadhiyadani waxa ay ku lug leeyihiin in guddi ka mid ah asxaabteena ay wadaagaan sheeko-shaqsiyeedkooda oo ay ku jiraan wax kasta laga bilaabo caafimaadka maskaxda ilaa joojinta dhiigga caadada, naafanimada, ahaanshaha qof da'a yar oo ka mid ah Weetabix, jihaynta galmada, iwm. Kal-fadhiyadan waxaa loo qabtaa si khadka tooska ah afartii biloodba mar waxaana qabta hoggaamiye sare.

> "Habka ugu guulaha badan ee aan ka helnay Weetabix si aan u wadaagno sheekooyinka wuxuu ahaa isticmaalka kal-fadhiyadeena quraacda ee Ku Daritaanka Aan Qofka Laga Reebayn, kuwaas oo aan wadnay in ka badan saddex sano hadda.

Munaasabadda shabakadeynta xawaaraha, waxaan ka hadalnay sida kal-fadhiyada quraacda ee ku saabsan ka mid noqoshada aysan kaliya u dhiirigelin asxaabteena, laakiin sidoo kale ay u keenaan waxqabadyo sabab u noqda isbedel, sida siyaasaddayada joojinta dhiigga caadada, maalgashiga taageerada Daryeelayaasha UK iyo cusboonaysiinta tashiilaadkayga naafada. Kooxdayadu waxay sidoo kale awoodeen in ay ka qayb galaan kulanada kale ee shabakadeynta xawaaraha si ay wax uga bartaan ganacsiyada kale si ay gacan uga geystaan sii wadida inay ka dhigaan Weetabix meel loo wada dhan yahay oo laga shaqeeyo.

SHIRKADDA POST HOLDINGS: TAAGEERADA BULSHADA

## Taageerida Hawlgalka Cilmi-Baarista Cunnada, Ciidanka Badbaadada iyo Diirinta Warner

Xarunta dhexe ee shirkadda Post Holdings' ee St. Louis, qurxinta goobta ee xilliga fasaxa ayaa xitaa aad u xiiso badnaa iyadoo labada dhismo ee la dhisay ay ka buuxsanaayeen baaskiilo iyo boorsooyin waaweyn. Muuqaalladani waxay ahaayeen natiijada ka dhalatay deeqsinimada shaqaalaha ka qaybqaatay laba hawlood oo samafal oo kala duwan bilihii Nofembar iyo Disembar 2022.

Bishii Nofembar, shaqaaluhu waxay ka qaybqaateen dadaalada "Coats and Cans" si ay gacan uga gaystaan Hawlgalka Cilmi-Baarista Cunnada iyo Warner's Warm-Up, dadaalka dheer laga sameeyey St. Louis coat drive. Ku dhawaad 50 jaakad oo cusub oo si tartiib ah loo isticmaalay ayaa la qeybiyey, iyadoo sidoo kale la qeybiyey sanduuqyo badan oo cunto iyo agabka daryeelka shakhsi ahaaneed ah. Jaadaha, agabyada cuntada iyo nadaafadda ayaa la siiyay kuwa Hawlgalka Cilmi-Baarista Cunnada uga baahan shabakadeeda hay'adaha adeegga bulshada iyo hoy la'aanta.

Bishii Disembar, shaqaaluhu waxay ka qaybqaateen ololaha Salvation Army's Angel Tree, kaas oo xaqiijiyey carruurta danyarta ah inay helaan hadiyadaha Kirismaska. Shaqaaluhu waxay "korsadeen" ilmo, iyagoo hadiyado ka soo iibsanayay liisaska rabitaankooda oo ay ku jiraan walxo u dhexeeya nigis, baaskiil iyo alaabta ay carruurtu ku ciyaaraan.

"Waa wax lagu farxo in la arko qof walba oo isu imaanaya si ay u taageeran kuwa bulshadeena ugu baahida badan," ayay tiri Lisa Hanly, Agaasimaha, Isgaarsiinta Shirkadaha iyo madaxa Guddiga Deeq Bixinta ee Shirkadda Post Holdings. "Shaqaalahayagu waa kuwo deeqsi ah, naxariis badan oo u shaqeeya koox ahaan si ay St. Louis uga dhigaan meel ka wanaagsan."

**Qof kastaa wuxuu xaq u leeyahay inuu fadhi ka helo miiska.**

*Cuntadu waa lama huraan. Waxay nafaqaysaa jirkeena. Maskaxdeena ayay shidaal ku shubtaa. Iyada oo aan loo eegin asalkayaga, cuntadu way ina mideysaa oo waxay nagu xiriirisaa qoysaskeena iyo asxaabtayada.*

*Haddana dad badan ayaa ku dhibtooda inay cunto ku filan miiska usoo saaraan qoyskooda. In ka badan 38 milyan oo qof oo ku nool Maraykanka, oo ay ku jiraan 12 milyan oo carruur ah, ayaan haysan cunto ku filan. Kanada gudaheeda, ku dhawaad hal ka mid ah toddobadii qofba (boqolkiiba 14.6% dadweynaha ku nool wadanka) ayaa lagu qiyaasaa inay ku nool yihiin qoysas cunto-yeri ka dhex jirto. Labada waddanba, haqab-beel la'aanta cuntadu waxay si aan xad lahayn u saamaysaa qoysaska iyo shakhsiyaadka midabka leh, oo ay ku jiraan dadka madowga iyo dadka asaliga ah.**

*Xigashooyinka: USDA; Xarumaha Cunnada Bulshada ee Kanada; Quudinta Ameerika; Cilmi-baarista Siyaasadda Haqab-beelka Cuntada PROOF



KOOXDA WACYIGELINTA EE SHAQAALUHU HOGAAMISO EE NOOC ALAABEEDKA MACAAMIISHA EE SHIRKADDA POST:

## Shabakadda Wacyigelinta DEI



*Waxaa qoray Mahlia Matsch, Maamulaha Sare, Maareynta Kartida, Waxtarka Org*

Iyadoo muuqaalka shaqaalaysiinta uu sii socdo inuu kobcayo, soo jiidashada iyo shaqaaleysiinta shaqaalaha tayada sare waxay noqotay mid aad u adag – oo tartan badan - waligeed.

Deyrtii hore, Guddiga La-talinta ee Qeybta Summada Macaamiisha ee Shirkadda Post (PCB) DEI waxay iskaashi la sameeyeen kooxda Helitaanka Hibada si loo dhiso Shabakadda Wacyegelinta DEI. Shabakadda, oo ka kooban ilaa 30 shaqaale ah, waxay u adeegtaa sidii kheyraad dheeraad ah taas oo si firfircoon loogu wadaago fursadaha shaqada iyo kor u qaadida PCB si looga dhigo meel fiican oo laga shaqeeyo. Hadafka shabakadu waa in la taageero ballanqaadka PCB ee kordhinta tirada murashaxiinta shaqada ee kala duwan ee doonaya jagooyinka shirkadeena.

Shabakadda Wacyagelinta ee DEI waxa ay ka faa'ideysataa isku xirka, khibradaha, iyo asalada kala duwan ee shaqaalaheenna si ay u kordhiyaan ka qaybgalka tooska ah ee lala sameeyo shaqaalaha ku soo biiri doona shirkadda iyada oo loo marayo munaasabadaha shaqaaleynta ee kambaska, bandhigyada shaqada, ururada xirfadleyda, ururada kale iyo xiriirada gaarka ah.

Marka ay ka qaybgalayaan munaasabadaha, xubnaha shabakadu waxay wadaagaan macluumaadka ku saabsan ururka, waxay bixiyaan fikrado ku saabsan waayo-aragnimada shaqaalaha, oo waxay ka jawaabaan su'aalaha runta ah ee ku saabsan ballanqaadka ururka ee ku aadan DEI. Dhawr bilood gudahood, shabakadu waxa ay ku mashquulsanayd samaynta shuraako cusub iyo sii kordhinta xiriirka hadda jira.

**TUSAALEYAALKA DHACDOOYINKA EE KA SOO QAYBGALEEN XUBNAHA SHABAKADA:**

### 11+
### Bandhigyada Xirfadaha Shaqada ee Dayrta ee Jaamacadaha iyo Kuliyadaha

### Bandhiyada Macluumaad ee Ururada Ardayda
*(Naadiga Qeybinta Alaabta (Supply Chain Club) – St. Thomas, Packaging Club – UW Stout)*

### Dooda Guddiga
*(Ku Tababarashada Shaqada/Xirfadaha Hore ee Shaqada – Dugsiga Maareynta ee Carlson)*

### Munaasabada Shabakada Soo Dhoweynta Shirkadda
*(Dugsiga Maareynta ee Carlson)*

### Munaasabada Maalinta Loobiga
*(Qeybta Injineernimada – North Carolina A&T)*

### Borofaylada Xubinnimada Handshak
*waxay suurtagelinaysaa la xiriirida tooska ah ee ardayda iyo marin u helka bandhigyada khadka tooska ah, dhacdooyinka soo socda iyo kuwo kale oo badan*

**Shabakadda Wacyigelinta DEI waxa hadda lagu tijaabinayaa goobaha Lakeville and Asheboro ee PCB.**